

# Bugg-yar – [SAITS] ee xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta loogu talagalay


Appka [SAITS waa loogu talagalay xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta](#) Waxaad xilhaayeha xannaanadda/waalidka ahaan nagu wargelin kartaa ka maqnaansho. Waxaad isla goobtaas ka aqrisan kartaa warbixin ku saabsan jadwalka ubadkaaga, xog ku saabsan sannad-dugsiyeedka iyo shahaadooyinka. Adigoo isticmaalayo Aqoonsiga farsamada digitalka ku salaysan ee loo yaqaanno [e-legitimation - Bank-ID] ayaa guda geli kartaa.

## Ku biiri ama wax ka beddel warbixinta faahfaahinta xiriirka

Marka ugu horeeyso ee aad guda galayso app-ka [SAITS] ee xilhaayeha xannaanadda/waalidka, waa inaad ku buuxiso faahfaahinta xiriirka ee adiga ku gaarka ah. Marka hore jag-sii halka magacaaga u ku qoran yahay, kaddib ku buuxi faahfaahinta xiriirka ee adiga ku gaar ah. Isla sidaas sameey haddii goor dambe aad wax ka beddelayso Faahfaahinta xiriirka adiga ku gaarka ah.



Sida aad wax ugu biiriso ama wax ugu beddesho faahfaahinta xiriirka awgeed, sida tusaale lambarka taleefankaaga ama e-mailkaaga, waxaad jag-siisa qallinka buluugga ee dhinada midigta kaaga muuqdo.



## Na wargeli ka maqnaansho


Marka hore jag-sii magaca ubadkaaga




Kaddib jag-sii Ka maqnaansho [frånvaro]



Haddii ka maqnaanshada ay maalin xiriir la leedahay, xulo taariikhda kaddib calaamadeey afargeysta ku hor taallo "Hela dagen" kaddib jag-sii [spara].



Haddii ka maqnaanshada ay hal maalin oo idil ku saabsan tahay, xulo taariikhda, saacadda ay bilaabanayso iyo saacadda ay dhamaanayso.



The screenshot shows the 'Frånvaro' (Absence) form. It includes fields for 'Startdatum' (2021-08-24) and 'Slutdatum' (2021-08-24). The 'Starttid' is set to 08:10, and the 'Sluttid' is set to 09:45. A dropdown menu is open for the end time, showing options: 10:45, 09:45, and 08:44. A red arrow points to the '09:45' option in the dropdown.


Jag-sii [Spara]. Wargelinta Ka maqnaanshada imminka way ku kaydsan tahay, waxaana indha-indhayn karo maamulka iskuulka adiguna waad dhamaysay wargelinta ka maqnaanshada.



The screenshot shows the 'Frånvaro' form with the 'Spara' (Save) button highlighted. The form fields are: 'Startdatum' (2021-07-05), 'Slutdatum' (2021-07-05), 'Starttid' (08:10), and 'Sluttid' (09:45). A red arrow points to the 'Spara' button.

## Eeg iskudarka xaaladda ka maqnaanshada ee ubadkaaga

Haddii aad doonayso inaad indha-indhayso iskudarka xaaladda ka maqnaanshada ubadkaaga jag-sii falaarta dhinaca midigta kaaga muuqato.



The screenshot shows the 'Summering' (Summary) page. It displays the following information:

- Sensat rapporterad frånvaro
- Från: 2021-07-05 08:10
- Till: 2021-07-05 09:45
- Registrerad tid: 1 timme 35 minuter
- Verifierad frånvaro 2021 - 2022
- Odkänd: 0t 0m
- Ogiltig: 0t 0m
- Mer detaljer...

A red arrow points to the right arrow icon in the top right corner of the summary card.

## Warbixin ku saabsan xaaladda dugsi-dhigashada ubadkaaga

Haddii aad jag-siiso magaca ubadkaaga waxaa ku oo if-bixi doono muqaalka hoos kaaga muuqdo. Waxaad halkas ku indha-indhayn kartaa:

- hoosta [Kalendaraka] dhaqdhaqaaq-maalmeedka
- wargelinta ka maqnaansho / eeg iskudarka xaaladda ka maqnaanshada ee ubadkaaga
- hoosta [Ämnen] qorshaha waxbarashada iyo shahaadooyinka. Haddii aad xilhaayeha xannaanadda/waalidka u tahay arday dugsi sare dhigto, cinwaanka waa [Kurser] beddelka [Ämnen].

